

Dukumiintiyada la aqbali karo si loo xaqiijiyo

Fadlan u isticmaal macluumaadkan si aad u aqoonsato nooca iyo qaabka dukumentiyada la aqbalayo si loo xaqiijiyo da'da ilmaha, ciwaanka qoyska iyo dakhliga Waaxda Waxbarashada Seattle iyo Barnaamijyada Barashada Hore (DEEL) ee preschool iyo daryeelka ilmaha. Sawirada ama noocyada elektarooniga ah ee dukumentiyada waa la aqbali karaa.

Da'da ilmaha

Si loo xaqiijiyo da'da looga baahan yahay barnaamijyada, soo gudbi hal dukumeenti oo ka kooban magaca ilmaha iyo taariikhda dhalashada ee liiskan:

- Shahaadada dhalashada
- Diiwaanka Caafimaadka
- Dukumentiga socdaalka
- Baasaboorka
- Aqoonsi Dawladdu Soo Saartay

Cinwaanka

Qoysasku waa inay ku noolaadaan Seattle la isku daray (incorporated) si ay ugu qalmaan barnaamijyada DEEL. Qoysaska ku jira kala-guurka, ay haysato hoy la'aan, ama haddii kale aan awoodin inay keenaan dukumeenti ciwaan leh, isticmaal Foomkayaga Guriyeynta [ee halkan](#). Dhamaan dukumeentiyadu waa inay ku jiraan magaca waalidka/masuulka oo buuxa oo taariikhdooda tahay saddexdii bilood ee la soo dhaafay gudahooda ama lo aqoonsan karo inay hadda yihiin. Macluumaadka ku yaal bannaanka baqshadda lama aqballo. Ama soo gudbi hal dukumeenti oo asal ah ama laba dukumeenti oo kale.

Xaqiijinta Ciwaanka Koowaad

Soo gudbi hal dukumeenti oo liiskan ka mid ah:

- Biilasha Tamarta
 - Tusaalooyinka waxaa ka mid ah gaaska, biyaha/qashinka, internet-ka, iftiinka/korontada, Cable, telefoonka gacanta, iwm.
- Caymiska guriga/kireystaha
- Dukumiintiga deymaha
- Heshiis kiro oo la saxiixay
- Warqadda wakaaladda guryeynta
- Rasiidka kirada

Xaqiijinta Ciwaanka ee Kale

U soo gudbi laba dukumeenti oo ah ilo kala duwan oo liiskan ah:

- Dukumentiyada caymiska
 - Tusaalooyinka waxaa ka mid ah caafimaadka, baabuur, kiro, iwm.
- Dukumentiyada maaliyadeed
 - Tusaalooyinka waxaa ka mid ah bayaanka bangiga, bayaanka kaarka deynta, bayaanka deynta ardayga, iwm.
- Dukumentiyada dakhliga
 - Tusaalooyinka waxaa ka mid ah TANF, SSI, paystub, iwm.
- Shatiga darawalnimada
 - Waa inuu hadda ahaadaa
- Biilasha kale

Dakhliga

Soo gudbi dhamaan cadeynta dakhliga waalidka/masuulka ee qoyskaagu helo. Waxaa la idinka dooneynaa cadeynta dakhliga taasoo ku xiran nooca dakhliga. Haddii aad ka diiwan gashan tahay Barnaamijka Xanaanada Varuurta ee Seattle (SPP) oo aad qaadato gargaarka cuntada ee SNAP ama TANF, soo dir cadeynta gargaarka lagu siiyo ama saxiix foomka ogolaashaha DSHS oo [halkan ka heli karto](#). Cadeyn dheeraad ah oo dakhliga la xiriirta lagaama doonayo. Qoysaska ka diiwaan gashan Barnaamijka Xanaanada Caruurta ee doonaya in lacagta oo dhan laga bixiyo lagama doonayo in ay keenaan cadeyn dakhliga soo gala ah, waxaa lagaa doonayaa in aad buuxiso foomka Kharashka Waxbarashada [oo halkan aad ka heli karto](#).

Shaqaalaysiinta

- Dabada Jeega saddexdii bilood ee ugu dambaysay ee lacag bixinta
 - Mushaarka usbuucii la bixiyo? 12 Jeeg dabadood
 - Mushaarka la bixiyo labadii toddobaadba mar? 5 ilaa 7 Jeeg Dabadood
 - Mushaarka la bixiyo labadii biloodba mar? 6 jeeg dabadood
 - Mushaarka bil walba la bixiyo? 3 Jeega haraagooda
- Warqadda loo-shaqeeyaha ama iimaylka
 - Marka aadan heysan qeybta dambe ee jeegga ee 3 bilood ee ugu dambaysay. Ku so dar taariikhda bilowga, saacadaha la shaqeeyay, mushaharka, iyo taariikhda laga bilaabo 90 maalmood ee la soo dhaafay
- Qofka iskii u shaqaysta
 - Istimaal Foomka Iskaa-u-shaqaynta [ee halkan](#)
- Waxkale
 - Istimaal Foomka Taageerada Ilmaha [ee halkan](#)
- Daraasad shaqo
 - Warqad abaal-marin ah ama warqad kormeere leh saacado/mushahar

Masruufka Carruurta

- Maxkamad haday amartay
 - Dukumeenti rasmi ah oo leh qadar

Ardayga

- Kaalmada dhaqaale
 - Warqadda abaal-marinta & bayaanka waxbarashada

Dakhliga Kale

- Gargaarka lacageed ee dadweynaha
 - Warqadda ogolaashaha (TANF, SSI, ama gargaarka lacagta caddaanka ah) ama aad saxiixdaa Foomka Ogolaashaha ee DSHS [oo halkan aad ka heli karto](#)
- Dakhliga Kale
 - Bayaanka Saddex bilood
- Dakhliga kirada
 - Dukumeentiga canshuurta "Jadwalka E" ee sanad canshuureedkii ugu dambeeyay